Sefton Council

Trading Standards

Adeega Sharciga ee Beesha - Xirmada La Tallinta Ereyga Oraahda ah

Community Legal Service

Soomaali

DVD attached

Horudhac

Ku soo dhowoow xirmada hadalka talabixinta ah ee Adeegyada Sharciga Bulshada oo ay soo saareen Adeega Ganacsiga Sefton, Radiyaha BBC ee Merseyside iyo Gudiga Adeegyada Sharciga.

Adeega Sharciga Bulshadu wuxuu 31 waraaqood (leaflets) ku bixiyaa noocyada kala duwan ee sharciga, kuwan waxaa laga heli karaa adigoo waca Xafiiska Gudiga Adeegyada Sharciga ama www.clsdirect.org.uk

Community Legal Service Direct waa adeeg bilaash ah oo kaa caawinaya inuu xal u helo dhibaatooyinkaaga sharciga. Waxaad ka wici kartaa 0145 345 4345 si aad ugala hadashid la taliye sharci yaqaan ah wixii ku saabsan Gunooyinka Dawladdu bixiso, Deynta, waxbarashada ama helista adeegyada xaafadda ee wax kaala qabanaya dhibaatooyinka kale.

Saxanka Koobani (CD) wuxuu ku siinayaa guudmar ku saabsan dhibaatooyinka aad kala kulmi kartid nolosha maalin walba.

Saxanka waxaa ku jira talooyin ku saabsan arimahan hoose:

Dhibaatooyinka Alaabada iyo Adeegyada

Wax ka qabashada Deynta

Xuquuqdaada Markaad Shaqaynaysid

Xuquuqdaada haddii Guurkaaga Burbur ku Yimaado

Wada Noolaanshaha – Xuquuqdaada hadaad kala tagtaan

Iibsashada iyo Iibinta Guriga

Kiraystaha iyo Kireeyaha

Gurigaaga oo lagaa saaro

Codsashada Magangelyada

Socdaalka iyo Dhalashada

Xuquuqda Dadka Lixaadka La'

Midab takoorka

La Macaamilka Boliiska

Muranada Bulshada iyo Xaafadda

Xirmada La Tallinta waxaa looga dan leeyahay in ay tilmaan-bixin ahaato, la tallinta ku saabsan arrimaha qaaska ah ee sharciga la xiriira waa in lagu soo hagaajiyaa wakaalada ku hoos taxan " Caawinaad Dheeraad ah"

DHIBAATOOYINKA ALAABADA IYO ADEEGYADA

Haddii dhibaato kaa haysato waxaad iibsatay ama lacag ka bixisay, waxaa jira sharci ku caawinaya.

Maxaan sameeyaa haddii dhibaato iiga timaado shay aan dukaan ka soo iibsado?
Waa inaad ugu sheegtaa dukaanka sida ugu dhakhsaha badan, waxaa laga yaabaa inay lacagta kuu celiyaan, bilaash kuugu sameeyaan ama kuu bedelaan.

Sideey ku ogaanayaan waxay tahay inay sameeyaan?
Sharcigu wuxuu dhigayaa waxay tahay dukaanku inuu sameeyo haddii alaabta ay iibshaan raali lagu noqon waayo.

Maxaan sameeyaa haday i caawini waayaan?
Haddii dukaanku wax sixi waayo ama dhibaato kaa soo gaartay adeeg, sida hagaajinta guriga waxaad taageero iyo talo ka helaysaa hay'adda Consumer Direct ama ururada ku qoran waraaqda cinwaankeedu yahay taageero dheeraad ah oo la socota saxankan.

WAX KA QABASHADA DEYNTA

Haddii aad dib ula dhacday bixinta qof kugu leh lacag oo loo yaqaan 'deymiye', waxay leeyihiin awood sharci oo ay lacagtooda ku helaan. Deymanka qaarkood qaarka kale way ka culus yihiin waana iyaga marka hore in wax laga qabtaa.

Markaa deyntee ayaan marka hore wax ka qabtaa?
Kirooyinka iyo Deynta Guryaha lagu Iibsado (Mortgages), haddii aad bixin waydid kirada ama deynta guriga, mulkiilayaasha iyo bangiyada dayntu waxay xaq u yeelan karaan inay guriga kaa saaraan. Waa inay maxkamadda tagaan si ay tani u sameeyaan waxayna qaadan kartaa waqti, markaa waa inaad bilowdid inaad samaysid bixin joogta ah sida ugu dhakhsaha badan, iskuna daydid inaad heshiis la yeelatid aad ku bixinaysid lacagta lagugu leeyahay.

Haddii aan ka kiraystay falaad mulkiile khaas ah si gaar ah miyaa lay tixgelinayaa?
Waa inaad heshid caawinaad gaar ah haddii aad hoygaaga ka kiraysatay mulkiile khaas ah.

Ka waran dhibaatooyinka Biilka Canshuurta Degaanka?
Haddii aanad bixin canshuurta degaanka, talaabada ugu horaysa ee Golaha Degaanku qaadayaa inay kugu qasbaan inaad bixisid waxay noqonaysaa goodin ay kaga codsanayaan Maxkamadda Majistaraytka inay kugu amarto bixinta deynta 'liability order'. Haddii maxkamadu siiso amarka bixinta deynta, waxa micneheedu yahay Golaha Degaanku inuu samayn karo:

- Isticmaalka shaqaalaha deynta soo gura (waxay qaadanayaan alaabtaada wixii qiima leh); ama
- Inay ka goostaan lacagta mushaharkaaga ama gunada dawladdu ku siiso.

Deyntee ayaa ku xigta inaan wax ka qabto?
Gaaska, korontada, biilasha telefoonka iyo biyaha. Waxaad talo ka doonan kartaa wakaaladaha ku qoran warqadda caawinaad dheeraad ah ama la xiriir shirkadda si ay kuugu samayso habkaad u bixin lahayd.

Sidaan wax uga qabtaa deymanka kale?
Markaad iska bixisid deymanka sare ee muhiimka ah waa inaad xisaabisaa inay lacagi kuu soo harayso si aad isaga bixisid amaahaha ama kaararka deynta lagu qaato adigoo u qaybinaya wixii kuu soo haray. Waxaad caawinaad ka heli kartaa qofka dadka kala taliya arimaha lacagaha, Adeega Sharciga Bulshada ayaa kugu xiri kara kan kuugu dhow meesha aad ku nooshahay, ama waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah wakaaladaha ku qoran qoraalada taageerada.

XUQUUQDAADA MARKAAD SHAQAYNAYSID

Qof kastoo shaqaale ahi wuxuu xaq u leeyahay inuu helo warbixin qoraal ah, taasoo ku saabsan shuruudaha shaqada. Waa inaad tan ku heshid laba bilood gudahood markaad shaqada bilowday.

Miyaan xaq u leeyahay inaan ka shaqeeyo UK?
Waxaa jira dukumeentiyo kala duwan oo cadaynaya inaad leedahay xuquuq sharci.
Kuwan waxaa ka mida:-

- Nambarka caymiska qaranka (national insurance number);
- Waraaqda P45;
- Waraaqda ogolaanshaha shaqada; ama
- Shaambada baasaboorkaaga ku taal.

Imisaan filan karaa in laysiiyo?
Waxaa wadanka UK hadda leeyahay sharci dhigaya mushahaarada ugu hooseysa qaranka, cidda ku shaqaalaysay maaha inay tan wax ka hooseeya ku siiso. Kuguma qasbi karaan ama maslaxayn karaan inaad ka cafidid xuquuqdaada mushaharka ugu hooseeya qaranka. Haddii aanad helin mushaharka ugu hooseeya aadna ka dacwootid, waxaa ku difaacaya sharciga in lagu eryo ama wax lagu yeelo. Haddii lagu siiyo wax ka yar mushaharka ugu hooseeya, waxaad u dacwoon kartaa Khadka Caawinaada Mushaharka ugu Hooseeya Qaranka.

Waa imisa mushaharka ugu hooseeya qaranka?
Laga soo bilaabo October 2005, waxa weeye £5.05 hadaad jirtid 22 ama ka wayn tahay, £4.25 inta u dhaxaysa 18-21 jirka iyo £3.00 inta u dhaxaysa 16-17 jirka. Tirooyinkani waxay isbedelaan October walba.

Imisa saacadood ayaa cidda i shaqaalaysay igu qasbi kartaa inaan shaqeeyo?
Heshiiska shaqada ama warbixinta shuruudaha shaqada ayaa kuu sheegaya saacdaha aad shaqaynaysid. Xeerarka Saacadaha Shaqadu waxay sheegayaan inaadan shaqayn wax ka badan 48 saacadood asbuucii, hadaanad si qoraal ah ugu heshiin intaa ka badan inaad shaqaysid.

Ma inay aqoonsataa cidda i shaqaalaysay Midawgayga Shaqaalaha?
Cidda ku shaqaalaysay waxay la xaali kartaa midowga markay shaqaalaha kala heshiinayaan shuruudaha iyo xaaladaha shaqada.

Xageen ka heli karaa caawinaad dheeraad ah oo ku saabsan arimaha shaqaalaynta?
Waxaad ka heli kartaa mid ka mida wakaaladaha ku qoran waraaqda caawinaada dheeraadka ah ee la socota saxankan (CD).

XUQUUQDAADA HADDII GUURKAAGA BURBUR KU YIMAADO

Miyaan furitaanka ugu baahanahay qareen?
Waa fikrad wanaagsan inaad ka heshid talo khaas ah qareen markaad kala tegeysaan ama is furaysaan laakiin waxaa laga yaabaa inaad go'aansato inaad idinku heshiin kartaan.
Waxaad u baahan tahay caawinaada qareenka hadii:

- Caruur aad leedahay
- Aad is qabteen in ka badan waqti yar (shan sanadood); ama
- Ay jiraan hanti iyo lacag uu ku jiro guri.
- Aad leedahay nidaamka hawlgabka oo khaas ah

Anigu furitaankayga ma dhamaysan karaa?
Haa, haddii xaaladaadu mid toos ah tahay.
Maxkamadda Degmada ee degaankaaga ayaad ka helaysaa waraaqaha hagista iyo foomamka aad u baahan tahay.

Ma ka baaqsan karaa inaan maxkamad tago?
Waxaad weli u baahanaysaa inaad maxkamadda sii martid si furitaanka loo sameeyo, laakiin 'dhexdhexaadinta' ayaa ah hab kale oo lamaanku ay kaga gaari karaan heshiis caruurta iyo lacagta.

Miyaan u baahanahay qareen iyo dhexdhexaadiyaba?
Dhexdhexaadiyayaashu kuma siin karaan talo sharci ah, sidaad darteed waxaad u baahanaysaa qareen si aad u hubsato heshiiska la gaaray inuu kuu wanaagsan yahay. Sidoo kale, waxaa fiican wixii heshiis dhaqaalaha ku saabsan ah ee la gaaro in laga dhigo amar maxkamadeed.

Maxaan samayn karaa hadaanan furitaanka rabin?
Waxaad samayn kartaa kala tagis sharci ah (legal separation).

Maxaan u baahanahay si aan u sameeyo kala tagista sharciga ah?
Waxaad u baahan tahay inaad gaar u kala noolaataan si aad sharci ahaan u kala tagtaan.

Ma ka dhigi karnaa shuruudaha kala tagista sharci?
Waxaad ka qoran kartaan dokumeenti heshiis kasta ood caruurta, lacagta iyo guriga ka gaartaan. Waxaad tan samaynteeda ugu baahanaysaa inuu idinka caawino qareen. Dokumeentiga waxaa loo yaqaan 'deed of separation'. Haddii kale waxaa tan idiin bedeli kara inaad heshid kala tagista sharciga oo maxkamaddu bixiso.

Ka waran hadaan ku heshiin wayno arimaha dhaqaalaha ku saabsan markaan kala tagayno ama is furayno?
Waxaa jira hab aad kaga heli kartid ninkaaga ama naagtaada lacagta daryeelka ilmaha, waxaad u isticmaali kartaa helitaanka lacagta daryeelka ilmaha wakaaladda Child Support Agency.

Maxaan sameeyaa haddii ninkaygu ama naagtaydu ama qofka aan wada noolahay hadaanaan isqabin uu aniga iyo caruurtaba na dagaalayo?
Talaabada ugu horaysaa waa inay noqotaa ilaalinta naftaada iyo caruurta kadibna aad boliiska u wacdid. Haddii ay noqoto inaad guriga si kumeel gaar ah uga tagtid waxaa jira goobo ammaan ah oo aad tegi kartid. Waxaad heli kartaa Amar Maxkamadeed oo qofka aad wada nooshihiin lagaga saarayo guriga iyo ka joojinta inuu ku dhibo ama weeraro. Waa inaad sida ugu dhakhsaha badan u aragtaa qareenkaaga. Haddii dhaawac jismiya uu kugu dhacay way ku caawinaysaa hadaad sawiro ka qaadid ama cadaymo kale si ay kaaga caawinto dacwadda.

WADA NOOLAANSHAHA – XUQUUQDAADA HADAAD KALA TAGTAAN

Dadka qaar wada nool ayaan sharciga si sahlan ula jaan qaadi Karin, wada noolaanshihiinuna ma siinayo inuu qofba qofka kale ku yeesho xuquuq sharciya, ama mas'uuliyad sharciya. Midkiina kama dalban karo lacagta ilaalilnta ilmaha midka kale gurigana ma kala dhaxli kartaan haddii midkiin dhinto.

Arintan wax laga qaban karaa ma jiraan?
Sharci cusub oo hirgalay bisha December 2005 ayaa u ogolaanaya lamaanaha isku jinsiga ahi inay diiwaan geshaan wada noolaanshahooda kadibna siyaabo badan loogu tixgeliyo sidii dad isqaba. Tani ma khusayso lamaanka ninka iyo naagta ah ee aan isqabin.

Maxaa ku dhacaya gurigayaga hadaan kala tagno?
Haddii bilowgii aad si fiican sharciga ugu qeexdeen qof walba xaalkiisa, waxay idinka baajinaysaa dhibaato hadhow inay dhacdo markaad kala tagaysaan. Tusaale ahaan, haddii guri aad wada iibsateen, waxaa muhiim ah inaad ku qeexdaan waraaqaha sida guriga loo kala leeyahay iyo mustaqbalka waxaad ka maagan tahay.

Sidaan arintaas u samayn karnaa?
Waxaad samayn kartaan heshiiska wada noolaanshaha 'living together agreement', waxaad caawinaad ka heli kartaa shabakada Isutaga Adeegyada Talabixinta, (The Advice Services Alliance), oo aad ka helaysid waraaqda caawimaada dheeraadka ah.

Miyay jiraan waxaan u baahanahay inaan samayno hadaan caruur leenahay?
Hooyada aan la qabini iyadaa leh mas'uuliyada waalidnimada. Tan waxaa loola jeedaa iyadaa iska leh dhamaan xuquuqaha iyo waajibaadka waalidnimo.

Aabaha ka waran?
Aabuhu wuxuu yeelanayaa xuquuqaha iyo waajibaadyada hooyada mid la mid ah haddii magaciisu ku qoran yahay warqadda dhalashada ama uu jiro heshiis ama amar maxkamadeed oo siinaya mas'uuliyada waalidnimada.

Waxaad caawinaad dheeraad ah ka heli kartaa ururada ku qoran waraaqda la socota saxankan.

IIBSASHADA IYO IIBINTA GURIGA

Maxaan sameeyaa hadaan rabo inaan iibsho gurigayga?
Hadaad iibsanaysid ama iibinaysid guri ama falaad, qofka kuugu horeeya ee aad la xiriiraysaa waa dilaalada guryaha (estate agent).

Haday jirto ashkato aanu dilaalku xaliyi Karin ama ururkiisa xirfadlayaashu (hadduu xubin ka yahay), maxaad samaynaysaa?
Waa inaad la xiriirtaa waaxda xeerinta ganacsiga ee golaha degaankaaga. Waxaa kaloo jira Xeerbeegti (Ombudsman) ay leeyihiin Dilaalada Guryuhu oo eegaya ashtakadaada. Laakiinse, nidaamkan xubno kama wada aha dilaalada guryaha oo dhami, waana inaad iska hubisaa ka hor intaanad heshiiska la gelin.

Haddii iibsadaha laga siiyay guriga akhbaar khaldan ka hor intaanay ku heshiin inay iibsadaan, miyey magdhow ku yeelanayaan dilaalka guriga ama iibiyaha.
Iibsadaha iyo iibshuhu sharci ahaan way ku wada jiraan iibka kamana bixi karaan mar haddii la saxiixo heshiiska ayna iswaydaarsadeen qareenadu ama sharci yaqaanka guryuha. Heerkan markay joogto, iibsaduhu wuxuu bixinayaa 10% qiimaha lagu heshiiyay.

Kala iibsashadu waxay dhamaystirmaysaa marka iibsaduhu bixiyo lacagta inta ku harsan.

Maxaan samayn karaa haddii wax khaldamaan?
Haddii ay ku siiyeen adeeg liita qareenka ama sharci yaqaanka guryuhu, cabashadaadana si fiican wax uga qaban waayaan, waxaad samayn kartaa kuwan soo socda:

- Qareenka waxaad uga dacwoon kartaa Adeega Dacwyooyinka Macaamiisha ee Jamciyadda Sharciga (Law Society's Consumer Complaints Service). Haddii aad ku qanci waydid habkay wax uga qabteen dacwadaada, waxaad u gudbin kartaa Xeerbeegtida Adeegyada Sharciga (Legal Services Ombudsman).
- Sharci yaqaanka guryaha, waxaad uga dacwoon kartaa Golaha Sharci Yaqaanada Guryaha (Council for Licensed Conveyancers).

Haddii khasaare dhaqaalaha ahi ku soo gaaray oo ay ugu wacan tahay qareenka ama sharci yaqaanka guryaha oo samayn waayey wax laga rabay, waxaa dhici karta inaad heshid magdhow. Waxaad u baahanaysaa qareen wax kaala qabta arintan.

KIREYSASHADA IYO KIREYNTA

Hadaad siisid kiro/lacag qofka iska leh meesha aad ku nooshahay waxaad tahay kireyste. Sharciga u yaala kiraystayaasha iyo mulkiilayaashu waa mid adag xuquuqdaaduna waxay ku xirnaanaysaa hadba nooca uu yahay heshiiskaad gashay.

Sidaan ku ogaanayaa nooca kireystaha aan ahay?
Waa inaad eegtaa heshiiskaad la gashay mulkiilaha guriga. Hadaanad haysanin waxaad waydiisaataa nuqul mulkiilaha, waxaa loo yaqaan heshiiska degista guriga.

Muxuu heshiisku ka kooban yahay?
Waa inuu kuu sheegaa qofka mulkiilaha ah, inuu yahay Golaha Degaanka, Xiriirka Guriyeynta ama mulkiile gaar ah.

Muxuu yahay farqiga u dhaxeeyaa?
Waxaad helaysaa ilaalin dheeraad ah haddii mulkiiluhu yahay Golaha Degaanka ama Xiriirka Guriyeynta. Ilaalin tan hore ka yar hadduu yahay mulkiile gaar ah weliba haddii qofkaasi ama dad u shaqeeyaa ay ku nool yihiin isla goobta ama maalin kasta qolalka nadiifiyaan.

Haddii aan qof la noolahay miyaan xuquuq yeelanayaa?
Maya haddii aadan ku qornayn heshiiska degista guriga.

Ka waran haddii mulkiiluhu doonayo inuu guriga iga saaro
Inta badan mulkiiluhu waa inuu ku siiyaa ogaysiis hadduu doonayo inuu guriga kaa saaro. Haddii kireystuhu ku guuri waayo dhamaadka waqtiga ogaysiiska lagu siiyay, mulkiiluhu wuxuu bilaabi karaa waxa loogu yeero 'la wareegista guriga (possession proceedings). Kireystuhu qasab maaha inuu ku guuro dhamaadka waqtiga ogaysiiska lagu siiyay, laakiin waxaa dhici karta inay bixiyaan kharashka maxkamadda hadaanay ka bixin guriga.

Maxaa dhacaya haddii mulkiiluhu helo amarka la wareegista guriga?
Haddii maxkamaddu siiso mulkiilaha la wareegis buuxda waqti cayiman, marka waqtigaa la dhaafo waxay codsan karaan warqadda awoodsiinta (warrant). Tan macnaheedu waxa weeye inay maxkamaddu dirayso saraakiil (bailiffs) kireystaha guriga ka saarta. Hadaad tahay kirayste aadna heshid warqadan awoodsiinta saraakiisha, waa inaad si degdeg ah u raadsataa talo iyo caawino.

Guud ahaan waa sharci darro inuu mulkiiluhu guriga ka saaro kiraystaha amar maxkamadeed la'aantiis. Waxaa jira xaalada dhowra oo aanu yeelanayn kireystuhu ilaalintan. Tan ugu badani waa marka ay meel ku wada nool yihiin mulkiilaha.

Hadaad tahay kireyste la handaday, ama si aan sharci ahayn mulkiile gaar ahi guriga uga saarayo, waxaad la xiriirtaa sarkaalka xiriirka kireystayaasha ee golaha degaankaaga.

GURIGAAGA OO LAGAA SAARO

Haddii guri la'aani kugu dhacayso maadaama uu mulkiilahaagu kaa saarayo gurigaaga ama falaatkaaga, waxaa jira sharciyo kaa ilaalinaya in si cadaalad laguula dhaqmo laguna siiyo fursad aad wax kaga qabatid lacagta kirada laguugu leeyahay, tusaale ahaan. Waa muhiim inaad si dhaqso leh wax uga qabatid hadaad ku socotid inaad guri la'aan ku dhacdid.

Dhamaan Maxkamadaha Degaanka Merseyside waxaa jooga la taliyayaal marka la dhegeysanayo dacwadaha guri la wareegista. Waxay kaa caawini karaan inay xaaladaada kuu sharaxaan iyo inay kuu helaan hab aad gurigaaga ku haysatid. Waxa fiican inaad sida ugu dhakhsaha badan u doonatid talo.

Maxaa loola jeedaa hoylaawe?

- Waxaad haysataa meel aad ku noolaatid, laakiin ma joogi kartid adigoo ka werwersan amaankaaga. Khatartu maaha inay kaaga imanayso qof guriga kugula nool. Waxay ka iman kartaa deris ama lamaanahaagii hore.
- Xaaladda gurigaagu waa mid aad u liidata, khatarna ku ah caafimaadka.
- Ma haysatid meel aad ku noolaatid adiga iyo qoyskaaguba.
- Gurigaaga waa lagaa qafishay, laguumana ogola inaad ku noqotid.
- Waxaad ku nooshahay guryaha la jiito ama guri dooni ah mana haysatid meel aad si sharciya u dhigatid.

Maxaan samayn karaa hadaanan haysan meel aan ku noolaado?

Hadaad tahay hoylaawe ama aad u dhowdahay inaad noqoto adigoon khaladkeeda lahayn, wuxuu ku siin karaa golaha degaanku meel aad joogtid ama ku noolaatid. Tani waxay ku xiran tahay xaaladaada. Waa inaad leedahay 'baahi culus' aadna 'xaq u leedahay kaalmayn'.

Sidaan ku ogaan karaa inaan xaq u leeyahay kaalmayn?

Xaq uma yeelan kartid hadaanad caadiyan ugu noolayn UK, ama aanad xaq u lahayn gunooyinka ama aad dhowaan wadanka UK ku soo noqotay adigoo dibedda ku noolaa.

Waa inaad raadsataa talo hadaanad hubin, ama aad u malaynaysid inaad caawinaad ku heli kartid sabab kale. La taliyahaaga, dhakhtarkaaga, ama adeegahaaga bulsho hadaad leedahay, ayay tahay inuu ku caawino haddii adiga ama qof aad la nooshahay uu beylah yahay.

Goorma ayaanu Golaha Degaanka i caawini karin?

Golaha Degaanku kuma caawini doono haddii ay u arkaan inaad adigu iska dhigtay 'hoylaawe si ula kac ah'. Waxay sidan u arkayaan haddii:

- Aad ka guurtid guri aad deganaan kari lahayd;
- Khaladkaaga ay ku timid in guriga lagaa saaro;
- Golaha Degaanku kugu caawinay degaan kugu haboon laakiin aad diiday; ama
- Adigu iska yeeshay hoylaawe si aad uga faa'iidaysato nidaamka.

Golaha Degaanku maaha inay kaa dhigaan inaad iska dhigtay 'si ula kac ah hoylaawe' haddii:

- Guriga lagaa saaray markaad bixin kari weydey kirada ama deynta guriga aad ku iibsatay, tusaale ahaan, markii shaqada lagaa eryey ama aanad helin kaalmada gunadda adigoo xaq u leh;
- Gurigaagu ku haboonayn in lagu noolaado; ama
- Aanad ogeyn xuquuqdaada aad ku deganaan lahayd.

Haddii Golaha Degaanku yiraahdaan adigaa si ula kac ah hoylaawe isaga dhigay weli waxay ku siinayaan guri waqti yar haddii baahidaadu ay culus tahay. Laakiin tani waa waqti ku siman intaad meel kale ka helaysid.

Waxaad raadsataa talo ku saabsan waxaad samayn lahayd, waayo sharciga qaybtani aad ayuu u adag yahay.

Maxaa dhacaya haddii mulkiilahu rabo inaan guriga ka baxo?
Haddii mulkiilahaagu (ama ha ahaadaan kuwa gaar ah, golaha degaanka iyo xiriirka guriyeynta) rabo inaad guriga ka baxdo, inta badan waxaad xaq u leedahay inaad gurigaaga deganaanto ilaa ay maxkamadda ka helaan warqadda 'la wareegista guriga'. Caadiyan waxay u baahan yihiin inay ku siiyaan ogaysiis inay arintan samaynayaan, haddii aanay doonayn inay guriga kaa saaraan adigoo sameeyey anshax xumida bulshada (anti social behaviour) awgeed.

Sidoo kale mulkiiluhu wuxuu u baahanayaa inuu helo amarka la wareegista guriga haddii uu meel kugula nool yahay. Haddii taasi jirto, waxay u baahanayaan keliya inay ku siiyaan ogaysiis macquul ah oo aad guriga kaga guurto.

Ka waran haddii mulkiiluhu uu rabo inuu guriga iga saaro?
Waa sharci darro inuu mulkiiluhu guriga kaa saaro amar maxkamaddeed la'aantii, tani waxaa ku jira in qufulka la bedelo adigoo guriga ka maqan. Laakiinse, haddii aad ku nooshahay guri ama falaat aad la wadaagtid mulkiilaha, ama mulkiiluhu ku siiyo cunto ama nadiifiyo guriga, uma baahanayo inuu helo amar maxkamadeed, laakiin waa inay ku siiyaan ogaysiis macquul ah oo aad guriga kaga guurto.

Maxaan samayn karaa haddii mulkiiluhu i handado?
Haddii lagu handado, ama si sharci darro ah uu guriga kaaga saarayo mulkiilaha gaarka ah, waxaad la xiriirta sarkaalka xiriirka kiraystayaasha (ama qofka qaabilsan handadaada iyo saarista sharci darada ah) ee golaha degaanka.

Waxaad kaloo ka dacwoon kartaa maxkamadda, inkastoo aad u baahanaysid cid kaa caawinta sharciga.

CODSASHADA MAGANGELYO DOONKA

Qofkee heli kara magangelyo doonka?
Helista magangelyo doonku waxay ku xiran tahay inaad qaxooti tahay. Qaxootigu waa qof ku sugan wadankuu u dhashay debediisa taasoo ay ugu wacan tahay cabsi rasmiya oo uu ka qabo in wax lagu yeelayo sababta ah:

- qabiilka;
- diinta;
- jinsiyada;
- xubin ka noqoshada urur bulsheed gaar ah; ama
- aragti siyaasadeed

Maxaan sameeyaa?
Waxaa muhiim ah inaad u heshid caawinaad khaas ah codsashada magangelyo doonka. Si dhakhso leh u raadso talo. Dib laguuguma celin karo wadankaad u dhalatay ilaa laga xaqiijiyo khatarta laguu gaysan karaa inay yar tahay ama aanay jirinba. Waxaa lagugu celin karaa wadan kale oo ammaan ah iyadoo aan la tixgelin codsigaaga. Waa inaad muujisaa in waxyeelada lagu gaarsiinayaa ay aad macquul u tahay.

Sidaan u codsan karaa magangelyo doonka?
Waqti kasta waad codsan kartaa magangelyo doonka, laakiin waa inaad codsataa ama marka ugu horaysa ee aad soo gaartid goobaha laga soo galo UK ama hadaad halkan ku joogtid si sharciya sida arday ahaan oo kale, waa inaad codsataa marka ugu horaysa ee ay timaado cabsida aad ka qabtid in wadankaaga wax lagugu yeelayo.

Xaggaan ka codsadaa?

- sarkaalka socdaalka ee garoonka diyaaradaha ama dekedii aad ka soo degtay; ama
- Xafiiska Arimaha Gudaha (Home Office), Unugga loo yaqaan Asylum Screening Unit ee Croydon iyo Liverpool haddii aad joogtid UK

Maxaan ku noolaan karaa intaan sugayo?
Haddii aanad lacag haysan waxaad codsan kartaa kaalmo inta codsigaaga laga eegayo.

Xaggaan ka heli karaa caawinaad dheeraad ah?
Haddii aad u baahan tahay wakiil sharci oo kuu metela si bilaash ah, waxaad ka heli kartaa Adeega Community Legal Service (CLS). Waxaa kaloo jira ururo kale oo ku siin kara talo ku saabsan arimaha magangelyo doonka iyo socdaalka.

SOCDAALKA IYO DHALASHADA

Miyaan u baahanahay ogolaansho inaan imaado UK?

Haddii aanad lahayn dhalasho Biritish ah ama ka iman wadamada barwaaqo sooranka waxaad u baahanaysaa ogolaansho inaad wadanka joogtid, dadka qaarkoodna waxay u baahan yihiin fiise inay yimaadaan UK.

Ka waran hadaan haysto dhalasho wadan ka mida Ururka Dhaqaalaha Yurub?

Waxaad u tahay fasax inaad timaadid kana tagtid waqtigaad doontid UK.

Ka waran hadaan rabo inaan ka shaqeeyo UK?

Waxaad u baahanaysaa fasax shaqo, shirkadda aad u shaqayn doontid ayaa kuu codsanaysa fasaxa shaqada adiguna markaas waxaad u baahanaysaa inaad codsatid fasax aad ku joogtid.

Maxaan samayn karaa hadaan u baahanahay inaan joogo waqti ka dheer intii lay ogolaaday?

Waxaad u baahan tahay inaad ka codsatid Xafiiska Arimaha Gudaha (Home Office) ka hor intaan waqtiga ogolaanshuhu kaa dhamaan.

Ka eeg caawinaada dheeraadka faahfaahin ku saabsan ururada aad kala xiriiri kartid talosiinta.

XUQUUQDA DADKA LIXAADKA LA'

Xeerka Disability Discrimination Act 1995 ayaa ku ilaalinaya haddii qof kale lagaa tixgeliyo iyadoo ay sababtu tahay lixaad li'idu.

Maxaa la oran karaa waa lixaad li'i?

Jismiga ama maskaxda oo daciifa taasoo saamayn xoog leh ku yeelata waxqabadka maalin kasta.

Goormay eexashadu dhici kartaa?

Waxay ka dhici kartaa shaqada, iskuulka ama kuliyadda, markaad iibsanayso ama isticmaalayso adeegyada, ama aad iibsanaysid ama kiraysanaysid meel aad ku noolaatid.

Maxay yihiin waxqabadka maalin kasta?

Sida socodka, isticmaalka gacmaha, waxqaadista, wada shaqaynta jismiga, waxqabadka xubnaha oo aad maamusho, hadalka, maqalka iyo araga, xusuusta.

Maxaan samayn karaa hadaan u malaynayo inaan tixgelin buuxda laysiin?

Waxaad magdhow ka codsan kartaa xeerbeegtida shaqooyinka (employment tribunal) ama Maxkamad. Waxaad kaloo caawino ka heli kartaa ururada ku qoran warqadda la socota saxankan.

MIDAB TAKOORKA

Midab takoorku wuxuu dhacaa marka qof kale lagaa tixgeliyo iyadoo xaaladahu isku mid yihiin ama isu dhow yihiin.

Muxuu yahay Midab Takoorku?
Waa marka qof kale lagaa tixgeliyo iyadoo sababtu tahay qoladaada, midabkaaga, jinsiyadaada ama meeshaad ka soo jeedid.

Tani miyay la mid tahay waxyeelada midabka ku salaysan?
Maya, waxyeelada midabku waa dembi, tusaale ahaan haddii lagu soo weeraray waa inaad la xiriirtaa boliiska.

Maxaan sameeyaa haddii lay midab takooray jinsiyadayda awgeed?
Waxaad talo ka heli kartaa midawga shaqaalaha, xarunta sharciga xaafadda, ururka Citizens Advice Bureau ama qareen.

Waxaa kaloo ku qoran meelaha aad caawinaad dheeraad ah ka heli kartid warqadda la socota saxankan.

LA MACAAMILKA BOLIISKA

Boliisku awood ayay leeyihiin ay isticmaali karaan haday u maleeyaan inaad dembi gashay ama aad geli doontid laakiin, **maxaan sameeyaa haddii boliiska dhibaato iga haysato?**
Boliisku waa inay kuula dhaqmaan si ixtiraam leh sidaas darteed haddii sarkaal boliis ahi kuula dhaqmo si xun waxaad uga dacwoon kartaa Gudiga Independent Police Complaints Commission. Waxaad ka helaysaa faahfaahintooda waraaqda caawinaada dheeraadka ah.

Miyay jiraan wax kale oo aan samayn karaa?
Waxaad qaadi kartaa talaabo sharciya ood ku codsanaysid magdhow. Waxaa fiican inaad kala tashatid qareen samaynta arintan.

Waxaad ka heli karaysaa qareen xaafadaada ah markaad la xiriirtid Community Legal Service Direct, faahfaahinta waxaad ka helaysaa warqadda la socota saxankan.

MURANADA BULSHADA IYO XAAFADDA

Muranada xaafadda iyo bulshadu inta badan waxay ka bilaabmaan buuqa, baabuur dhigashada, xayawaanka la dhaqdo, marinka dhulka.

Markaa maxaan sameeyaa haddii dhibaato iga haysato deriska?
Waxaa ugu wanaagsan inaad la hadashid qofka dhibaatadu kaaga imanayso, waxaa laga yaabaa inaanay ogsoonayn inay kuu gaysanayaan dhibaato.

Haddii taasi wax tari waydo maxaan sameeyaa?
Waxaad la xiriiri kartaa adeega dhexdhexaadinta, waxay isku deyi doonaan inay qof walba la hadlaan si xal loo helo.

Sidaan tan u samayn karaa?
Waxaad ka heli kartaa adeega kuugu dhow, oo inta badan bilaash ah, adigoo la xiriiraya Mediation UK, oo ku qoran warqadda caawinaada dheeraadka ah.

Ka waran haddii dhexdhexaadintu shaqayn waydo?
Waxaad la xiriiri kartaa golaha degaanka haddii ay ku saabsan tahay qaylo. Waxaad ka helaysaa nambarka buugga telefoonada.

Wax ma ka qaban karaa haddii dhibaatadu ku saabsan tahay caruur?
Waxaad la xiriiri kartaa sarkaalka boliiska xaafadda.

Waxaad ka helaysaa faahfaahinta ururada kaa caawinaya buuqa iyo muranka deriska warqadda Caawinaada Dheeraadka ah.

With special thanks to :-

Tony Snell	BBC Radio Merseyside
Val Roberts	Sefton Council Trading Standards
Alison Mc Calmont-Woods	Sefton Council Trading Standards
Ernie Li	Novas Translation and Interpreting Service
Dene Comish	Printdirect (UK) Ltd

Caawinaad Dheeraad ah

Community Legal Service Direct
tel. 0145 345 4345
www.clsdirect.org.uk

Consumer Direct
tel. 08454 04 05 06

Citizens Advice
(check phone book for local office)

Age Concern
tel. 0800 009 966

Advice Services Alliance
www.advicenow.org.uk/livingtogether

Advisory, Conciliation and Arbitration Service for Employment Problems
tel: 0845 747 4747

Amnesty International
tel. 020 7033 1503

Commission for Racial Equality
tel. 020 7939 0000
www.cre.gov.uk

Consumer Credit Counselling Service
tel. 0800 138 1111

Disability Rights Commission
tel. 08457 622 633
www.drc-gb.org

Equal Opportunities Commission
tel. 0845 601 5901
www.eoc.org.uk

Independent Police Complaints Commission
tel. 08453 002 002

Immigration Advisory Service
tel. 020 796 71200

Immigration Law Practitioners Association
www.ilpa.org.uk

Law Society
tel. 020 7242 1222

Liberty
tel. 0845 123 2307

Mediation UK (Community Mediation)
tel. 01179 046661
www.mediationuk.org.uk

National Domestic Violence Helpline/ Womens Aid and Refuge
tel. 0808 2000 247

National Minimum Wage Helpline
tel. 0845 6000 678

Ombudsman for Estate Agents
tel. 01722 333 306
www.oea.co.uk

Refugee Legal Centre
tel. 020 7780 3200

Shelter
tel. 0808 800 4444
www.shelter.org.uk

Haddii aad jeclaan laheyn in aad dhiibato fikrado ku saabsan Xirmadan La Tallinta ah fadlan warqad ku soo hagaaji Maareeyaha Heerarka Ganacsiga oo ah Trading Standards Manager, Environmental Protection Department, 1st Floor Magdalene House, Trinity Road, Bootle.

Sefton Council

Trading Standards

Community Legal Service

novas GROUP